

## **Talooyinka safar ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo waddamada ama meelaha ay khuseeyaan**

Marka aanu u aragno in aanay habboonayn in dadka norwiijigu u safraan waddamada qaar ama meelaha qaar waxaa Wasaaradda Arrimaha Dibedda(UD) ay ka soo saartaa talooyin safar. Sababtuna ugu horrayn waa qiyaas buuxda oo aanu ku samayno xaaladda ammaan. Talooyinka ku saabsan in la iska ilaaliyo safarrada dalka dibeddiisa ee aan aad muhiimka u ahayn waxay wax ka tareen tallaabooyinka ka hortagga isqaadsiinta xanuunka, khasatan inta lagu jiro xaaladaha xanuunka safmarka ee karoonaha. Riix halkan([her](#)) si aad u hesho warbixino ku saabsan waddanka aad rabto in aad u safarto iyo in uu ka mid yahay waddamada talooyinka safarku ay khuseeyaan.

Talooyinka safarada ee Wasaaradda A. Dibedda laguma qasbana in la raaco sida sharcigu dhigayo. Sidaa darteed lama kulmayaan wax ciqaab ah dadka u safra waddamada ay talooyinka safarka khuseeyaan. Sidaas oo ay tahay haddana qofka dhibaatooyin ayaa ku iman kara haddii uu doorto in uu sidaa safarkiisa ku aado.

Inta badan shirkadaha caymisku ma siiyaan caymis safar dadka u dhoofaya waddamada ay talooyinka safarku khuseeyaan. Shirkadaha caymisku iyaga ayaa iskood go'aan uga gaadha qofka ay caymis siinayaan. Haddii aad caymis la'aan u safarto waddan kale waxaad ogaataa in kharash badan oo adiga kuu gaara ahi kugu iman karo, tusaale ahaan sida in aad hosbitaal gasho. Waddamo badan ayaa xanuunka safmarka koroonaha dartii hosbitaalladu ay buuxi karaan. Qof kastaa marka uu safrayo waa in uu la xiriiraa shirkaddiisa caymiska si uu u ogaado in uu haysto caymis safarkiisa ku habboon.

Haddii aad u safarto waddan ka mida waddamada aanu ka soo saarnay talooyinka safarrada waxaa adkaan karta in aanu hadhow ku caawino. Waxaa kale oo shaqadayada xanibaad ku noqon kara dagaallo dhaca, xaalado ammaandaro, duullimaadyada/isu socodyada oo la xaddido iwm. Haddii baasaboorku kaa lumo waxaa nagu adkaan karta in aanu kuu samayno mid cusub, ama aanu ku caawino haddii aad xanuunsato amaba aad xabsi gasho.

Adiga ayuun baa og oo qiyaasi kara in safarku yahay mid aad muhiim kuugu ah. Wasaaradda A. Dibedda kuuma qiyaasi karto. Haddii aad go'aansato in aad safarto waxaa muhiim ah in aad mar walba ka fekerto waxyaabahan, sida in aad:

- Shirkadaha caymiska kala hadasho caymiska safarkaaga ugu habboon
- Safarkaaga ka diiwaan gelisid barta internetka: [reiseregistrering.no](http://reiseregistrering.no)
- Haysato lacag kugu filan intaad safarka ku jirto iyo intaad maqantay oo dhan
- Hubiso in baasaboorkaagu aanu waqti dhow dhacayn. Waddamo badan ayaa dadka ku xidha in baasaboorku aanu muddo dheer dhacayn.

Haddii aad wax su'aala qabto ku soo dhowoow oo la soo xiriir Xafiiska wasaaradda A. dibedda ee arrimahan qaabilsan, epost: [247@mfa.no](mailto:247@mfa.no) ama telf 23 95 00 00.